

Working Connections Child Care (Xidhiidhka Shaqada ee Daryeelka Ilmaha)

Working Connections Child Care (Xidhiidhka Shaqada ee Daryeelka Ilmaha, WCCC) wuxuu ka caawiyaa qoysaska u qalma inay iska bixiyaan daryeelka ilmaha. Marka qoysku u qalmo child care subsidy (kaalmada daryeelka ilmaha) oo ay doortaan bixiye u qalma, gobolka ayaa bixinaya qayb ka mid ah kharashka daryeelka ilmaha. Waalidiintu waxay masuul ka noqon karaan lacag bixinta wadaaga ah ee ay siinayaan adeeg bixiyahooda bil kasta.



Shuruudaha U qalmitaanka Aasaasiga ah ee Faa'iidooyinka child care subsidy (Kaalmada daryeelka ilmaha)

- ✓ Qoysku waa inay ku noolaadaan Gobolka Washington
- ✓ Dakhliga qoyska waa inuu ahaadaa ama ka hooseeya 60% State Median Income (Dakhliga Dhexe ee Gobolka, SMI) marka la codsado ama 65% SMI marka dib loo codsado
- ✓ Qoysku waa inuu lahaadaa hanti ka hoosaysa \$1 milyan
- ✓ Qoysaska waxaa laga yaabaa in loo oggolaado u-qalmitaanka ballaadhinta hawlaha qaarkood oo ay ku jiraan:
 - Ka shaqaynta Daryeelka Ilmaha Guriga Liisanka Haysta, Xarun, Early Childhood Education and Assistance Program (Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Caruurnimada Hore, ECEAP), ama Barnaamijka Head Start
 - Ilmahaagu inuu ku biiro Early Childhood Education and Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada iyo Waxbarashada Caruurnimada Hore, ECEAP) Dhalasho ilaa Sadex Jirka ama barnaamijka Head Start-ga Hore
 - 12 bilood ee ugu horreeya ee barnaamijka shaqo-barasho ee gobolka ee diiwaangashan

- ✓ Child Care Subsidy (Kaalmada Daryeelka Ilmaha) waxay ka caawisaa bixinta kharashka daryeelka ilmaha halka waalidka, ama waalidiinta guri laba waalid leh, ay ka qayb qaadanayaan hawl la ansixiyay. Hawlaha la ansixiyay waxaa kamid ah:
 - Shaqo ama iskaa u shaqeyste xagga sharciga, dakhli soo xarayn, hawlaha la canshuuri karo
 - Hawlaha lagu ansixiyey sida waalidka WorkFirst ama qorshaha BFET
 - Hawlaha waxbarashada waxaa kamid ah:
 - Barnaamijyada dugsiga sare ama u dhigma dugsiga sare ee waalidiinta da'doodu tahay 21 iyo ka yar
 - Imaanshaha kuleejka bulshada, farsamada, ama qabiilka oo waqti buuxa ah iyo raadinta shahaado dhexe ama shahaado xirfadeed
 - Imaanshaha kuleejka bulshada, farsamada, ama qabiilka oo waqti buuxa ah iyo raadinta shahaado dhexe ama shahaado xirfadeed IYO inuu shaqeeyo 20 saacadood todobaadkii
- ✓ Qoysaska ay haysato hoy la'aanta waxaa laga yaabaa in loo oggolaado ilaa 12 bilood si ay u caawiyaan xalinta arrimaha ku xeeran hoy la'aanta

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, dhalasho ama heerka socdaalka, da'da, nooca galmada ama aqoonsiga lab iyo dhedig, mujaahid ama xaalad ciidan, heerka hooyo nuujinaysa, iyo joogitaanka wax kasta oo jidh ahaan la xidhiidha, dareen, ama naafo maskaxeed ama isticmaalka hagaha eyga ama adeegga xayawaanka. Haddii aad jeclaan lahayd nuqullo daabacaadan ah oo bilaash ah oo qaab kale ah ama Luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION EPS_0075 SM (10-2024) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

U qalmitaanka dakhliga

Dakhliga ugu badan ee qoysku waa 60% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka, SMI).

Xadka ugu badan ee dakhliga bishii marka loo eego tirada qoyska ayaa ku qoran hoos:

Cabbirka qoyska	0 ilaa 20% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka) <i>MA JIRO KHARASH CAAFIMAAD</i>	Ka badan 20% ilaa 36% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka) <i>\$65 KHARASHKA CAAFIMAADKA</i>	Ka badan 36% ilaa 50% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka) <i>\$90 KHARASHKA CAAFIMAADKA</i>	Ka badan 50% ilaa 60% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka) <i>\$165 KHARASHKA CAAFIMAADKA</i>	Waxka badan 60% ilaa 65% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka)* <i>\$215 KHARASHKA CAAFIMAADKA</i>	Waxka badan 85% State Median Income (Dakhliga dhexe ee Gobolka)** <i>XADIDIKA DAKHLIGA</i>
1	\$0-\$1,135	\$1,136-\$2,044	\$2,045-\$2,839	\$2,840-\$3,407	\$3,408-\$3,691	\$4,827
2	\$0-\$1,485	\$1,486-\$2,673	\$2,674-\$3,713	\$3,714-\$4,455	\$4,456-\$4,827	\$6,312
3	\$0-\$1,834	\$1,835-\$3,302	\$3,303-\$4,586	\$4,587-\$5,504	\$5,505-\$5,962	\$7,797
4	\$0-\$2,184	\$2,185-\$3,931	\$3,932-\$5,460	\$5,461-\$6,552	\$6,553-\$7,098	\$9,282
5	\$0-\$2,533	\$2,534-\$4,560	\$4,561-\$6,334	\$6,335-\$7,601	\$7,602-\$8,234	\$10,768
6	\$0-\$2,883	\$2,884-\$5,189	\$5,190-\$7,207	\$7,208-\$8,649	\$8,650-\$9,370	\$12,253
7	\$0-\$2,948	\$2,949-\$5,307	\$5,308-\$7,371	\$7,372-\$8,846	\$8,847-\$9,583	\$12,532
8	\$0-\$3,014	\$3,015-\$5,425	\$5,426-\$7,535	\$7,536-\$9,042	\$9,043-\$9,796	\$12,810
9	\$0-\$3,079	\$3,080-\$5,543	\$5,544-\$7,699	\$7,700-\$9,239	\$9,240-\$10,009	\$13,089
10	\$0-\$3,145	\$3,146-\$5,661	\$5,662-\$7,863	\$7,864-\$9,435	\$9,436-\$10,222	\$13,367

Isticmaal shaxda kore si aad u go'aamiso haddii qoyskaagu u qalmi karo WCCC iyo si loo go'aamiyo qiyaasahaaga kharashka caafimaadka. Tusaale: Haddii reerkaagu ka kooban yahay adiga, xaaskaaga, iyo laba carruur ah, cabbirka reerkaagu waa afar. Haddii dakhligaagu yahay \$4,100, kharashka caafimaadkaagu wuxuu noqonayaa \$90 bishii.

- Shaxda Xisaabinta Wadabixinta - Dhaqan-galaya Oktoobar 1, 2024:
www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/copay_calculation_table.pdf

*Qoysaska dib u codsanaya Kabka Daryeelka Caruurta iyagoon kala joojin adeega ayaa ku haboonaan kara dakhliga ilaa 65% Dakhliga Dhexe ee Gobolka iyo lacag-bixinta wadaaga ah ee \$215.

** Dakhliga ugu badan bishii ee Kabka Daryeelka Caruurta inta lagu jiro mudada kuhaboonaanshaha la ansixiyey.

Habraca Codsiga

Waalidku waa inuu buuxiyaa codsiga WCCC iyo habka xaqijinta.

- Qoysasku waxay dalban karaan iyagoo la xiriiraya Child Care Subsidy Contact Center (Xarunta Xiriirka Kaalmada Daryeelka Carruurta) 1-844-626-8687 ama onleen ahaan www.WashingtonConnection.org.
- DCYF waxay ururisaa oo dib u eegtaa macluumaadka si ay u go'aamiso u qalmitaanka qoyska.
- Qoysasku waxay u baahan doonaan inay siiyaan DCYF magaca iyo lambarka taleefanka bixiyaha xanaanada ilmaha. Uma baahnid inaad haysato bixiye ka hor intaadan codsan child care subsidy (kaalmada daryeelka ilmaha).



Su'aalo?

Qoysaska ama waalidiinta qaba su'aalo ku saabsan kharashka caafimaadka waxay soo wici karaan **Child Care Contact Center (Xarunta Xiriirka Kaalmada Daryeelka Ilmaha) DCYF** halkan [1-844-626-8687](tel:1-844-626-8687).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u qalmitaanka WCCC waxaa laga heli karaa www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/getting-help/wccc.

Ka wac CCA ee Xarunta Qoyska WA 1-800-446-1114 si aad u hesho caawimo uu kusiiyo bixiyaha daryeelka ilmuhu.